

OFFICIAL

<Resident Name>

<Address>

<SUBURB> VIC <POSTCODE>

Mudanaha/Marwada Halkan Degan

MACLUUMAAD MUHIIM AH OO LOOGU TALAGALAY DADKA KIRADA GURYAHA UGU JIRA EE DIB-U-DEJINTA LOO SAMEYNAYO

Guryaha cusub ee goobta ka ag dhow ayaa la dhameystiri rabaa, haddana waxaan idinku martiqaadeynaa inaad ballan samaysataan si aad u soo booqataan. **Tani waa fursadaada aad ku arki karto guri tusaale ah gudihiisa maadaama laga yaabo inaad doonayso inaad codsato mid ka mid ah guryahan.**

Ballanso waqti aad soo eegi karto

Ballan-qabsashadu way sahlan tahay, kaliya la xiriir qofka kaala shaqeynaya howlaha dib-u-dejinta. Haddii aadan aqoon qofkaas, fadlan iimayl u dir: relocationsteam@homes.vic.gov.au

Waqtiyada la soo eegi karo:

- **Holland Court, Flemington** - 17-ka bisha Agoosto ilaa 11-ka bisha Sebteembar

Waqtiyada ballanta la qabsan karo waa waqtiyo kooban, markaa fadlan xaqiiji ballantaada ka hor inta aan la gaarin **Jimcaha 14-ka bisha Agoosto**. Qofka u qaabilsan inuu kaala shaqeeyo howlaha dib-u-dejinta ayaa sidoo kale ku soo wici doona si uu kaagala hadlo fursaddan.

Kooxda u qaabilsan dib-u-dejinta iyo Community Housing Ltd ayaa joogi doona guryaha la soo eegayo si ay kaaga jawaabaan wixii su'aalo ah oo aad qabtid. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawimo sidaad u soo booqan lahayd guryahaas, ama aad u baahan tahay taageero kale, fadlan u sheeg qof ka tirsan kooxda dib-u-dejinta u qaabilsan.

Si aad qoraalkaan ugu akhrisato luqaddaada, booqo: homes.vic.gov.au/information-in-your-language.

Mahadsanid,

Peter Beaumont
Agaasimaha Howlaha Dib-u-dejinta
Homes Victoria

www.homes.vic.gov.au



@homesvic

